

Hagaha Waalidiinta ee Safe Harbor

DHALINYARADA LOOGA FAA'IIDAYSTAY GALMO

Qofka dhalinyarada ah ee looga faa'iidaystay galmada waa qof 24 jir ah ama kayar oo ku hawlan, oggolaaday inuu ka hawlgalo, ama lagu qasbay ama laga dhaadhiciyay inuu galo ficil galmo iyadoo loo ballanqaadayo wax kasta oo qiimo leh, sida lacag, cunto, dhar, kiro, ama hoy. Dhalinta ayaa sidoo kale looga faa'iideysan karaa galmo haddii isaga, iyada ama iyagu ay ku lug leeyihiin qoob-ka-cayaar qalaad, filim laga sameeyay iyagoo samaynaya falal galmo ah, galmo ku beddesheen daroogo, ama ku lug yeesheen fal dambiyeedka la xiriira dhillanimada. Qolo saddexaad ayaa laga yaabaa inay ku lug leeyihiin ama aysan ku lug lahayn.

Ka faa'iideysiga galmada ma horseedo kaliya dhaawac muddo gaaban iyo muddo dheer ah ee jireed, maskaxeed, iyo shucuureed, laakiin ilaa dhowaan Minnesota waxay ku xukumi kartay ulana dhaqmi kartay dhalinyarada looga faa'iidaystay galmada inay yihiin dambiiyayaal — dhallinta da'da yar ee ku hawlan falalka dhillsysiga.

SHARCIGA SAFE HARBOR IYO QAABKA JAWAABTA EE KA-HELIDDA TAAGEERO DHAMMAAN NIDAAMYADA TAAGEERADA DADWEYNHA

Marka loo eego Minnesota Safe Harbor, dhallinyarada Minnesota ee ku hawlan dhilleysiga ayaan mar dambe loo arki doonin inay yihiin dambiiyayaal laakiin waxaa loo arki doonaa inay yihiin dhibbanayaal iyo badbaadayaal. Sharciga Safe Harbor wuxuu ula dhaqmayaa dhalinyaradaan si sharaf iyo xushmad leh, wuxuuna ku hagayaa adeegyada ku habboon ee taageerada, oo ay ku jiraan hoyga iyo guriyeynta.

Si loo hirgaliyo Sharciga Safe Harbor, Minnesota waxay raaceysaa Qaabka Jawaabta ee Ka-helida Taageero Dhammaan Nidaamyada Taageerada Dadweynaha (NWD). Ujeeddada Ka-helida Taageero Dhammaan Nidaamyada Taageerada Dadweynaha waa in iyada oo aan la egayn meesha ay dhalinyarada lagu aqoonsado, ha ahaato iskuulada, kooxaha u doodista, rugaha caafimaadka, ilaalinta ilmaha, hirgelina sharciga, ama habab kale, uu xirfadle kasta awoodi doonaa inuu garto ka faa'iidaystaha uuna ogaan doonaa halka loo gudbinayo dhalinyarada si ay u helaan adeegyo.

SIDEE ILMUHU KU NOQON KARAA DHIBBANE?

Ka ganacsadayaasha/iibsadayaasha iyo dadka doonaya inay ka faa'iidaystaan dhalinyarada (oo ay ku jiraan xubnaha qoyska, dadka waaweyn ee la aamini karo, asxaabta/nimanka ay shukaansadaan/naagaha ay shukaansadaan, ama burcadyada) waxay ka faa'iidaystaan daciifnimo kasta oo uu dhalinyaradu qabi karo. Waxay isticmaali doonaan khalkhalgelin maskaxeed iyo inta badan gacan qaad. Ka faa'iidaystuhu badanaa wuxuu aad ugu fiican yahay khalkhalgelinta maskaxeed waxayna ujeedkiisu yahay inuu dhibbanaha daacad u ahaado waxay dooniba ha ku qaadatae.

Badanaa ka faa'iidaystuhu wuxuu bilaabi doonaa xiriir xanaano leh si uu u dhiso kalsoonida lagu qabo ganacsadaha. Tani waxay si toos ah ugu bilaaban kartaa in qofka dhalinyarada ah shakhsi ahaan loola tago, ama waxay u isticmaali karaan dhalinyarada kale inay qortaan dhibbanaha. Ka ganacsadayaasha waxay sidoo kale onlayn ku qori doonaan dhibbaneyaasha. Had iyo jeer waxay ka muuqan doonaan internetka iyagoo raadinaya dhalinyaro doonaya jacayl, aqbalaad, ama xitaa farax.

Dhallinyarada lagu ganacsado galmada ama looga faa'iidaysto galmada ma ahaan "caruur xun." Waa dhibbanayaal dembi. Xitaa haddii ay aaminsan yihiin inay xulashooyin leeyihiin oo aysan dhibbane ahaan isku aqoonsan, waa la bartilmaameedsaday, waa la khiyaameeyay, waxaana loo geeystay taraama.

ILAAALINTA AMNIGA ILMAHA

6 Tallaabooyin oo Caawinaya in la Ilaaliyo Ilmaha iyo Dhallinyarada

- 1. Fur khadadka wada xiriirka.** U sheeg carruurtaada inay kaala hadli karaan wax walba, iyadoon wax xukun ah jirin, xitaa haddii ay u malaynayaan inay adiga ka xanaajinayso. Runtii dhagayso carruurtaada. Ka faa'iidaystayaasha ayaa inta badan ku tiirsan inay dhibbanayaashooda dareemaan ceeb ama dambi si ay u aamusiyaan. Si joogto ah ugala xiriir cunuggaaga wixii ku saabsan waaya-aragnimadooda maalinlaha ah, saaxiibadooda, waxa ay ku faraxsan yihiin, iyo waxa walwal geliya. Aamina dareenkaaga oo weydii su'aalo haddii uu kuu muuqdo wax qaldan. Dhallinyardu waxay u nugal yihiin ka faa'iidaystayaashu markii aysan haysan cid ay la hadlaan, ama baahiyahooda shucureed aan la daboolin.
- 2. Kala hadal imahaagu xiriirada fiican.** Kala hadal ilmahaagu xiriirada fiican iyo kuwa aan fiicnayn, oo ay ku jiraan xuduudaha fiican. Ku qaabee xiriirada fiican guriga, gaar ahaan xiriirada u dhaxeeya dadka waaweyn. Dhallinyardu waxay dhahaan waxaa laga yaabaa inaysan ku lug yeelan lahayn ka faa'iidaystaha haddii ay garan lahaayeen sida xiriir fiican u eg yahay. Waqti la qaado ilmahaagu, oona tus in xiriirka aad iyaga la leedahay uu aad muhiim kuugu yahay.
- 3. Si firfircoon u danee noolashooda baraha bulshada.** Aqoon u lahaw baadqabka internetka iyo baraha bulshada. U danee noolasha onlaynka ah ee cunugaaga sida aad u danaysid noolashiisa ka baxsan interneetka. Ka faa'iidaystayaasha waxay isticmaalaan internetka si ay u helaan kalsoonida dhibbanaha. Kala hadal ilmahaagu weebayyada ay isticmaalaan, iyo muhiimada ay leedahay in aan la wadaagin macluumaadka shaqsigaha ah, iyo gaar ahaan shakhsi ahaan kula kulanka qofkasta oo ay kula kulmeen keliya onlayn, sida goobta ciyaarta. Ka hadal khatarta ay leedahay dhigida sawirrada galmada internetka, iyo fariin-ku-wadaagida (dirista ama helida sawirrada galmada iyada oo la adeegsanaya farriinta qoraalka ah), iyo in sawirradan/qoraalladani aysan weligood lumayn.
- 4. Baro asxaabta ilmahaagu.** Ka feejignow asxaabta aad uga da' weyn, ama u badan inay cunuggaaga ka fogaayaan asxaabta kale ama reerka. La soco asxaabta ay u badan tahay inay saameyn wanaagsan ku yeeshaan ilmahaagu kuna dhiirrigeli inay is ilaaliyaan. Haddii ilmahaagu uusan lahayn wax saaxiibo ah, ka caawi inuu la xidho dhallinyarada kale. Ha ku lug yeeshaan waxyaabo wanaagsan oo xiise geliya iyaga, farshaxanka, isboortiga, muusikada, adeegga bulshada, iyo kooxaha dhallinyarada.
- 5. Si daacad ah uga hadal galmada.** Ka hadal galmada caafimaadka leh, galmada, iyo galmada badbaadada leh adoo xooga saaraya xiriirka fiican. Bar wax ku saabsan ogolaanshaha, waxa ay tahay iyo waxa aysan ahayn. Bar ilmahaagu in ay xaq u leeyihiin inay diidaan galmo ama hawlo galmo xitaa haddii uu qof cadaadis saarayo. Dhallinyarada waa inaysan ka baran galmada baraha bulshada iyo waxyaabaha qaawan. Dhallinyarada laga faa'iidaystay ayaa noo sheego inay u baahnaayeen dad waaweyn oo siiyo macluumaad sax ah oo aan xukun lahayn oo ku saabsan galmada iyo hawlaha galmada marka ay yaraayeen.
- 6. Bar ilmahaagu waxyaabaha ku saabsan ka faa'iidaystayaasha iyo ka ganacsiga galmada.** Baro naftaada hana u qaadanin inaysan ku dhici doonin ilmahaagu. Kala hadal wax ku saabsan waxa ay yihiin ka faa'iidaystayaasha iyo ka ganacsiga galmada, in ka ganacsadayaasha, ka faa'iideystayaasha, iyo "maareeyayaasha" ay noqon karaan lab ama dhadig, sida ay ugu ekaan karaan dadka "caadiga ah", iyo inay raadsan doonaan daciifiyada dhalinyarada si uga faa'iideystaan. Bar sida ay tani u dhacdo iyo waxa la sameeyo haddii qof uu iyaga kula soo xiriiro onlaynka ama shakhsi ahaan. U ogolow inay kuu sheegaan isla markaaba haddii uu qof waxyeeladay iyaga ama iskudayay inuu waxyeelo.

CALAAMADHA DIGNIINTA/ TILMAAMAHA KAGANACSIGA AMA KA FAA'IIDAYSIGA

Ma jiro wax calaamad ah oo sheego ka faa'iidaystayaasha ama ka ganacsiga. Marka in ka badan hal calaamad oo ka mid ah kuwa hoose ay jiraan waxaa jiri kara walaac. Xilli hore ficil qaadista ayaa ka hortegi karta in ka faa'iidaystayaasha dhaco ama ka sii daro.

- Isbeddel lama filaan ah oo aan sharraxaad lahayn ee ku saabsan dabeecadda, niyadda, ama shakhsiyadda qofka
- Caddaynta in qof isku dayaya inuu si uu u kantoorolo ama u xukumo cunuggaaga
- Joogitaanka lama filaanka ah ee saaxiib/saaxibad ka da' weyn
- Astaamaha sumadaynta, mararka qaarkood qaab tattoosyo
- Qarinta cidda ay la hadlayaan ama la kulmayaan
- Ka sii fogaashada sii badanayso ee saaxiibadooda joogtada aha, iyo kuwa kale ee ay danaynayaan
- Lacag aan la sharxi karin, alaabooyin cusub, oo ay ku jiraan taleefannada gacanta, qaababka timaha oo cusub, qaabaynta gacmaha/lugaha ee aadan lach bixin
- Dugsi u goynta, imaashada guriga ee xili dambe ah, ama maqnaashada habeenkii oo aan sharraxaad lahayn
- Orodka

HADDII AAD TUHUNSAN TAHAY KA FAA'IIDAYSIGA GALMADA LA XIRIIR:

- Sharci Fulinta Deegaankaaga una sheeg inaad tuhunsan tahay ka ganacsiga galmada
- Baaraha Safe Harbor ee Gobolkaaga – www.health.mn.gov/communities/safeharbor/response/navigation.html
- Khadka Taleefoonka ee Maalinta Koowaad ee Adeegyada Safe Harbor ee Deegaankaaga: 1-866-223-1111

Ilaaha: Waalidka ayaa ilaaliya, <https://www.parentsprotect.co.uk/what-is-child-sexual-exploitation.htm>;

Codadka Safe Harbor: Ra'yiga badbaadaha & Dhallinyarta ee Qaabka Nidaamka Ka Faa'iidaystayaasha iyo Ka Ganacsiga Galmada ee Dhallinyarta Minnesota, www.hennepin.us/~media/hennepinus/your-gov-ernment/projects-initiatives/documents/no-wrong%20door-voices.pdf?la=en;

Ka Ganacsiga Aadanaha oo Dhexdayaga Kajira, <http://inourbackyard.org/keep-kids-safe-ht/>

LOVE146, www.love146.org; Waalidka ayaa ilaaliya <https://www.parentsprotect.co.uk/what-is-child-sexual-exploitation.htm>